



# Shaqada Iyo Wax Lahaanshaha

Leveled



Af Somali



Buuggan akhriska dheeriga waxaa maalgalisay hay'ada USAID. Waxaana si wada jir ah isaga kaashaday daabcayna hay'ada Save the Children, wasaarada waxbarashada heer federal iyo xafiiska waxbarashada DDSI.

2009 T.I.



The CC By license lets others distribute, adjust, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.


For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>



# Shaqada Iyo Wax Lahaanshaha

Fasalka 3

| Toddobaadka 23



## Baraha qaaliga ahow

Waxaa buugan luugu talagalay in uu kobciyo awooda akhriska ee radayda fasalka 3<sup>aad</sup>.

Waxaaana lagu saleeyay manhajka cusub ee af-soomaaliga. Doorarka baruhu aad ayuu mihiim ugu yahay in ardaydu ka faa'iidaystaan buugan.


Sababtoo ah waxaa laga raba baraha in uu ku booriyo ama ku dhiirigaliyo carruurta in ay akhristaan buugtan. Hadaba baruhu waa in uu raaca talaabooyinkan soosocda, marka ay tahay ardaydu in ay ku akhristaan fasalka gudahiisa.

1. Ka hor intayna ardaydu akhrinta sheekada bilaabin, waa in uu baruhu weydiiyaa su'aalaha ka horeeya sheekada.
2. Waa in uu baruhu ardayda siiyaa waqti fiican ooy ku akhrin karaan sheekada.
3. Baruhu waa in uu usheegu ardayda in ay ku celceliyaan akhriska sheekada.
4. Ardaydu markay dhammeeyaan akhiska sheekada, baruhu waa in uu waydiiyaa su'aalaha ku qoran dhammaadka sheekada.

### Laylis

Su'aalaha akhriska ka hor

1. waa maxay shaqadu?



## Shaqada Iyo Wax Lahaanshaha

Sida badan in wax layeesho ama wax la lahaado ma ahan fidri (mid lagu dhasho), hase yeeshee waxay in qofku wax yeesho ku timaadaa kasbasho, tacab iyo shaqo. Waxaa dhaqankeenna soomaaliyeed ka mid ah inuu qofku wax lahaado (waxyeesho) inta aanu tabar gebin ka hor.

Waxaa sida badan dhacda in ilmaha soomaaliyeed neef xoolaha laga siiyo marka

uu dhasho ama inta uusan qaan gaadhin kahor. dhaqanka noocaa ah ee ilmaha xoolaha la siiyo waxaa loo yaqaannaa (xuddumid) ama xudun xidh. Haddaba macnaha iyo ujeeddada qotada dheer ee ka dambeysa xuddumidda waxay tahay in ilmaha lagu beero lex jeclo iyo hawo sare iyadoo dadka ilmaha u xuddumaya ay yihiin waalidkiis ama ehelkiisa kale oo aad ugu hanweyn in ilmahaasi ku barbaaro kuna daydo dhaqanka isku filnaanshaha iyo wax dhaqashada ka jirta deegaanka uu ku nool yahay. Arrintu si kastaba ha ahaatee ilmihii la xuddumay marka uu qaangaaro haddii waliba uu yahay mid hooda iyo nasiib leh si dhaqsa ah ayuu neefkii la siiyay ugu bataa oo u tarmaa.

xoolaha neefkaasi ku jirana xoolaha kale way uga duwan yihiin wayna uga soocan yihiin, taasoo ku xambaarta inuu si aad ah uga taxaddaro inay dayacmaan, lumaan ama dhaqaale xumaadaan. Arrintaa ayada ah ayaa ilmaha ka dhigta marka uu waynaado mid bulshada dhexdeeda qiima ku leh, kana muuq iyo magac dheer dadka ay ayniga yihiin, looguna yeero naadada ah “heblo ama hebel” qaatana sifooyinka ay ka mid ka yihiin “Karti, dadnimo, waxgal, wax ku ool, fariid, shaqayste IWM”.



Sidaas daraaddeed aabuhu wuxuu ilmaha ku barbaarin jiray in ay wax tabcaan oo isku tashadaan. Waxay waalidku sidaas u samayn jireen si caruurtoodu u yeeshaan aasaas ay ka duulaan. Kana askumaan noloshooda.

Dhammaan waxyaalaha aan kor kusoo sheegnay waxay ka tarjumayaan dhaqankii soomaalida ee ka jiray Miyiga ee ku



salaysnaa xoolaha nool laakiin marka aan dhinaca magaalada eegno iyo dhaqamada ilbaxnimada cusub wata waxaa ilmaha ku dhasha magaalada ee waalid kiisu ama qaraabadiisu gacan ku siiyaan inuu waxbarto uuna helo xirfad uu ku shaqeysan karo, iyadoo waalidkuna uu ilmihiisa mararka qaar ku tijaabiyo inuu gacanta ka saaro lacag si uu wax ugu qabsado gaar ahaan dhinaca ganacsiga, ama dhanka kale.

Waxaa kaloo lagu tijaabiyaa inuu dhankiisa ka qabto xirfadaha uu qoyska nolol maalmeedka ka soo saarto. Intaa wixii ka dambeeya qofka marka uu gaaro heer dhallinyaro, miyi ama magaalo meel kasto oo uu joogaba waxaa sii kordha maalinba

maalinta ka dambaysa hawadiisa gaar ahaan marka uu qof xoog leh noqdo oo uu damco inuu qoyska intiisa kale ka madax bannaanaado ama uu doono inuu kaligii gooni u dego. gooni u shaqeysto ama uu lahaado maal ugaar ah oo aan cid kale la maamulin.

Haddaba marka qofka uu soo celceliyo fikirkiisa, isla tallintiisa iyo isla faqiddiisa ku abbaaran inuu gooni u istaago ayuu go'aansadaa ugu dambeynta in uu iskiis wax u qabsado. In qofku iskii wax u qabsadaana waxay ku tusaysaa in uu isku filnaansho rabo ama gaadhay. Waxayna horseed u tahay waxyaabaha aasaaska u ah dhalinta maanta soo koraysa. Kuwaas oo raba in ay shaqo ka raadsadaan suuqa. Tani waxay ka caawin in ruux noqdo mid aan cidna ku tiirsanayn.



## Iskaa wax u qabsashada

Iskaa wax u qabsanimadu waa in ruuxa noqdo ruux isku filan. Kaas oo aan cidna ka sugin in la shaqaaleeyo oo uu meel cidla ah iska fadhiyo. Waa mid ay bulshadu kaga bixi karto sugida cid kale. Taas oo aadan ogayn waxa ay kuu tari inta uu dhan yahay. Shaqooyinka iskaa wax u qabsanimadu waa muhiim. Waana mid

aadan isku halaynayn gacmo shisheeye ee aad iska wax u qabso ku shaqaysanayso. Shaqo ta kuugu dhawna aad qabanayso adigoon iskibrinayn.

Wakhtiyadii hore soomaalida Isku halleyn aad cid kale isku hallaysid waxaa loo arki jirnay gunnimo. Gunnimana waa baryo, baryana waa dullinimo iyo dhaawac sharafta kaa gaara. Kaalmo dibadda laga sugo iyo gacmo dhegasho (Gacmo hoorsasho) bulshadeena waxay ku ahayd ceeb iyo wax qalaad oo dibadda inaga soo galay. waxaa jira degmooyin badan oo deegaankeena ka mid ah oo qofka ka doorto dhimasho in uu cid kale baryo ama isku halleeyo. Waxay aabbayaasheen qabeen “qofka ma dhamma ilaa uu wax dhaqdo oo qoyska wax ku soo kordhiyo”.

sheekadaan gaaban ee soo socota ayaa ina tusaysa in uu jiray macnaha ah “waayo sugid” waxaa la sheegay in bari nin socota ahi u yimid nin geed hoostiis jiifa markaasuu ku yidhii “war maxaad u jiiftaa meesha” ninkii jiifay baa ugu jawaabay oo yidhi “ oo maxaan sameeyaa?” ninkii socotada ahaa baa yidhi “shaqee, wuxuu ugu jawaabay “maxaan helayaa haddaan shaqeeyo?” ninkii safarka ahaabaa yidhi “xoolaad heli” “Dabadeedna maxaan ku qaban ayuu yiri ninkii jiifay? Ninkii socatada ahaa baa yidhi”waad guursan oo carruur baad dhali, oo wax baad dhaqan”.



“kadibna maxaan heli?” ayuu isagoo weli jiifa ayuu su’aal u celiyey “waad nasan oo waad ku seexan” ayuu ninkii socotada ahaa ugu Jawaabay. Ninkii wuxuu yidhi “ oo haddaabaan hurdaaye maan iska jiifo oo nasiib kayga sugo”. Dhowr iyo toban sano kadib ayaa nin kale oo socoto ah la kulmay ninkii geedka hoos hurday oo macluul la kici waayay markaasuu salaamay oo yiri “ bal iska waran, sidee tahay?” “war dhafoor buu ku yaal” ayuu ninkii jiifay ku yiri.

Ninkii socotada ahaabaa intuu dhaqaaqay yiri “ wallee jiifka jiifbaa kaaga horreeyay” macnaha waxaa waaye markii aad yarayd maad shaqeyn oo iskuma tashan. Haddii aad isku tashan lahayd maanta sidaan maadan ahaateen qofkii ka baaqsada arrintaas waxaa loo yiqiin “Tacab laawe” ama dhaqan laawe. Tacab laawe lama tixgelin jirin, lalamana tashan jirin, beesha waa ka takoornaa ilaa uu waxtacbado oo qoyska wax ku soo kordhiyo dad iyo duunyaba. Waxayna ku kalifi jirtay inuu ruuxwalbaa shaqaysto oo wax tabcado.

Waxaa jira maahmaahyo badan iyo suugaan aad uga hadlaysa shaqada iyo wanaageeda. Waalidiintu ilmahooda ayay kula dardaarmi jireen “maandhow” saddex

Ilaahey kaama yeelo waase awoodaa:-

b. Ilaahow guursan maayee hay gablamin

t. Ilaahow cibaadaysan maayee hay  
cadaabin

j. Ilaahow xoogsan maayee xoolo isii

Seddexdaas Ilaahey waa awoodaa

kaamase yeelo, ujeedada laga leeyahay

dardaarankaas waxaa weeye fara madhan

waxba kuma yimaadaan waxaa loo baahan

yahay in fadhiga laga kaco oo la shaqaysto.

Ruux walbaana isku dayo sidii uu wax u

soo saaran lahaa.





## Guntii iyo gunaanadkii

Sida aynu kor ku soo aragnay waxa aad dareemi kartaa meesha ay soomaalidii hore kaga jirtay shaqadu. Iyo sida ay loo tixgalin jiray ruuxa shaqaysta hantina tabcado. Taas oo la isugu faani jiray ruuxa shaqaysta ee hantiilaha noqda halka hoos loo dhigi jiray ruuxa ma shaqaystaha ah. Kaas oo aan sumcad fiican ku lahayn bulshada uu la dhaqan yahay.

Hab nololeedkaas waa mid ay ku guul gaadheen dadyowgii hore iyado aynu odhan karo camal la'aanta dhalinta haysata sidan umaysan badnayn.

Sidaynu kor ku soo sheegnay maadaama ay ummada soomaaliyeed shaqada ku fiican yihiin waxay lahaayeen odhaahyo caan ah oo shaqada la xidhiidha. Tusaale ahaan waxaa jirta odhaahda tidhaahda “nimaan shaqaysan shaah ma cabo”. Odhaahdaa hadii aynu u fiirsano waxa aynu kala dhex bixi karnaa macno aad u badan kaas ku tusinaya shaqada iyo faa’iidada laga helayo. Waxaa kale oo uu ku tusinaysaa in ruux ma shaqaysti ihi uuna dadka la sinayn. Oo marka dadku shaqaday qabteen faa’iidadeeda helaan inuu ruuxaasi meel cidla ah fadhiyo.

Sidaas awgeed waxaa bulshadeena khaas ahaan dhalinteena ku wacyigalinaynaa in ay muruqooda maalaan. Lana yimaadan shaqo abuur iyagoo xirfadahooda iyo waxa ay barten ku shaqaysanaya. Halkii ay ruux kale gacanta hoos dhigan lahaayeen. Taas ayaynuna ku gaadhaynaa horumar iyo isku filnaansho. Bulsho aysan dadkeedu shaqaysan meelna ma gaadho. Shaqo waa sharaf noocay dooniba ha ahaatee. Ninkii shaqeeyaa sharaf leh umadna wax ku soo biirin kara. Lafihiisana wax u qaban kara meelna ku gaadhi kara. Markaa bulshooy balanteenu waa shaqo.

## Laylis

Ka jawaab su'aalahan soo socda:

1. Waa maxay xudun xidhku?
2. Waa maxay iskaa wax u qabso?
3. Muxuu diidanaa ninkii geedka hoos jiifay?
4. Shaqadu maxay faa'iido oo ay leedahay?
5. Maxaa lagu gaadhaa shaqada?

